


SI TOOS AH ONLINE

# Talaabo-talaabo (algoritmer), filtarka xumbooyinka iyo qolka jabaq-celinta (ekokammare)

**Nolol maalmeedkeenna waxaynu inta badan la kulannaa habraacyo – kuwaas oo ah tilmaamo sharxaya sida tallaabo-tallaabo loogu xalliyo dhibaato gaar ah. Tusaale ahaan, habka loo kariyo cuntada ama tilmaamaha alaabta la isugu rakibo. Laakiin talaabo-talaabadu sidoo kale waxay noqdeen kuwo caadi ka ah nolol-maalmeedka warbaahinta ee dad badan, maadaama ay saameeyaan waxa ka soo muuqda qulqulka baraha dhigitaalka ah ee kala duwan.**

## Sidee ayuu u shaqeeyaan nidaamyada talo-bixinta ee baraha bulshadu?

Si loo horumariyo khibradda isticmaalaha, loona kordhiyo wakhtiga, xiisaha iyo is-dhexgalka, baraha bulshada ee waaweyn (sida Facebook, Instagram iyo TikTok) waxa ka jira wax loo yaqaan nidaamka talo-bixinta. Kuwani waa nidaamyo talaabo-talaabo ah oo sameeya xulasho ka mid ah xogta aadka u badan ee ku jirta baraha, taas oo isticmaaluhu aanu awoodin ama aanu doonayn inuu si buuxda u wada arko. Iyadoo laga duulayo xogta taariikhiga ah ee uu isticmaaluhu soo saaray, nidaamyada talo-bixintu waxay isku dayaan inay saadaaliyaan waxa dhici kara mustaqbalka, isla markaana ay shaandheeyaan macluumaadka iyagoo ku salaynaya shuruudo gaar ah.

Baraha waaweyn ee dhigitaalka ahi waa shirkado faa'iido doon ah, kuwaas oo qaabka ganacsigoodu ku salaysan yahay iibinta xayeysiis si gaar ah loogu habeeyey isticmaalaha iyagoo matalaya macaamiishooda. Si ay taas u sameeyaan, waxay dhisaan profile (xog-ururin) ku saabsan isticmaale kasta, taas oo loo adeegsado in macaamiisha loo soo bandhigo koox bartilmaameed si gaar ah loo habeeyey oo ku salaysan demografi la doonayo. Maadaama baraha bulshadu ay wax badan ka ogyihiin isticmaale kasta, waxay habayn karaan halka, goorta iyo sida fariin xayeysiis gaar ah loo muujiyo si loo gaaro faa'iidada ugu badan ee macaamiisha.

Baraha bulshadu waxay isticmaalayaashooda u fidiyaan adeegyo soo jiidasho leh – oo lacag la'aan ah – kuwaas oo ujeedkoodu tahay in kor loo qaado ka qaybgalka isticmaalaha ee baraha bulshada. Markasta oo uu isticmaalahu wakhti badan ku bixiyo adeegyada baraha bulshad, ayay sii badataa fursadda uu ugu bandhigmi karo fariimaha xayaysiinta ee macaamiisha (shirkadaha xayaysiinta). Marka uu isticmaalku bato, isticmaalahu wuxuu sidoo kale bixiyaa xog badan oo isaga ku saabsan. Hab-dhaqankaas waxaa ku dhex jira dhammaan xogta dhisaysa aqoonta baruhu ka hayaan isticmaalaha. Sida saxda ah ee nidaamyada talo-bixinta ee baruhu u shaqeeyaan waxa og oo keliya baraha bulshada laftooda, balse maanta waa kuwo aad u adag, waxayna tixgeliyaan arrimo aad u badan, isla markaana si joogto ah ayay isu beddelaan.

Tusaalooyinka xogta iyo dabeecadaha saameeya waxa la muujiyo waxaa ka mid ah waxa aad gujiso, waxa aad faallo ka bixiso iyo isticmaalayaasha kale ee aad la falgasho, laakiin sidoo kale da'daada, meesha aad joogto, nooca qalabka aad isticmaalayso, inta aad daawato iyo qaybta fiidyowga aad eegto, iyo haddii aad istaagto si aad u akhrido waxa soconaya. Baruhu si joogto ah ayay u raadiyaan habab cusub oo ay ku fasiraan uguna saadaaliyaan isticmaalaha.

Baruhu sidoo kale laftoodu waxay go'aamiyaan waxa la muujinayo iyagoo ku salaynaya isbeddellada isticmaalka iyo kala duwanaanshaha gobollada, waxayna mudnaanta siiyaan waxyaabaha ay og yihiin inay isticmaalaha ku sii haynayaan shaashadda.

## Sidee ayaad u yareyn kartaa halista filtarka xumbooyinka iyo qolalka jabaq-celinta (eko-kammare)

Talo-bixinno ka imanaya baraha bulshada:

**Facebook**

- Isticmaal qaybta lagu baariro si aad u ogaato wax-yaabaha cusub kuwaas oo aan si gaar ah adiga kuugu waafajin.
- Guji siiso leh  ama Aan xiiso lahayn marka aad aragto qoraal, si aad si ku-meelgaar ah u kordhiso ama u yareyso in qoraallo la mid ah lagu tuso.

**Instagram**

- Isticmaal qaybta lagu raadiyo “Dib u dejin talooy-inka nuxurka. Shaqadani waxay dib u tirtiraysaa talooyinka laguu soo jeediyey.
- sticmaal shaqada Raacaya ama Kuwa ugu dam-beeyay. Markaas waxaa laguu soo bandhigayaa nuxurka ka imanaya boggaga aad raacdo, ayadoo loo eegayo siday u kala dambeeyeen wakhti ahaan.
- Isticmaal qaybta shaqada Maamul nuxurka laguu soo jeediyay. Halkaas waxaad ku arki kartaa nuxur-ka aad horay u tilmaamtay inaad xiisaynayso ama aadan xiisaynaynin.

**X**


- Isticmaal qaybta baaritaanka si aad u hesho nuxur aan si gaar ah adiga kuu waafaqsanayn.

**Tiktok**

- Dib u habeyn shaqsiyeysan.
- Dami habaynta shakhsi ahaaneed ee laguu habeeyey ee qaybta adiga laguugu talagalay ”For You”. Markaas waxaad heli doontaa nuxur ku sa-laysan waxyaabaha caanka ka ah deegaankaaga ama caalamka. Nuxurka waxaa loo soo bandhigi doonaa siday u kala horeeyeen , iyadoo loo eegayo xilligii la daabacay.

**Ka qayb qaadashada wararka arrimaha bulshada adigoo isticmaalaya baraha bulshada (9–12 sano)**

Xogta/Isha: Dhallinyarada & Warbaahinta 2025 (Ungar & medier 2025), Mediemyndigheten




## filtarka xumbooyinka iyo qolalka jabaq-celinta

Ilyadoo ay baraha bulshadu ay beddeleen habka ay dadku u helaan wararka iyo fikradaha, ayaa erey-bixinnada leh filtarka xubooyinka iyo qolka jabaq-celinta ay noqdeen kuwo aad u baahsan. Ereyadan waxay tilmaamayaan xaaladaha ka jira deegaannada dhijitaalka ah, halkaas oo hal nooc oo fikradaha ah oo kaliya lagu soo bandhigo, halka aragtiyada ka soo horjeeda ama kuwa caqabadda ku noqon kara la reebo ama laga saaro.

Ereyadan waa kuwo isku xiran laakiin kala duwan: filtar-ka xumbada waxaa abuura nidaamyada talo-bixinta ee baraha bulshada, halka qolka dhawaaq-celinta ay dadku abuuraan. Si kastaba ha ahaatee, saamayntoodu waa isku mid, waxayna ku saabsan yihiin in deegaannadaas ay abuuraan wareeg celin waxtar leh oo markasta isticmaa-laha siinaya wax la mid ah wixii uu horay u arkay. Waxay xaqiijiyaan oo ay xoojiyaan aragtida dunida ee uu istic-maalahu horay u haystay.

Fikradda ayaa ah in filtarka xumbada ay dhashaan sababtoo ah nidaamka talo-bixinta ayaa bartay dadka iyo noocyada qoraallada uu isticmaalahu la fal-galo, ka dibna wuxuu siiyaa muuqasho dheeraad ah oo gudaha feed-ka ah, isagoo sifeeya (reeba) wax kasta oo kale. Dhanka kale, qolka dhawaaq-celinta waxay ku saabsan tahay sida dad-ka ku jira deegaannada dhijitaalka ah ay ugu janjeeraan inay raadsadaan fikradaha ay la dhacsan yihiin ama ay ku raafsan yihiin.

In kasta oo erayadan si badan looga hadlo doodaha, haddana waa la isweydiinayaa saxnimadooda. Dadka dhaliisha bixiya waxay sheegaan in dadku had iyo jeer raadiyaan kooxo ay isku aragti yihiin, isla markaana ay la qabsadaan deegaanka ay si toos ah ugu nool yihiin, taa-soo qayb ka ah habka bulsho-wadaagga. Marka loo eego aragtidan, deegaanka dijitaalka ah waa muujin cusub oo ka tarjumaysa dabeecado hore u jiray, mana la micno aha in dadku aanay ka warqabin aragtiyo kale ama inaysan ka mid noqon karin aragtida guud ee dunida.

Cilmi-baaris ayaa muujisay in nidaamyada talo-bixinta ee baraha dhijitaalka ah ay yeelan karaan saameyn filtar lagu sameeyey oo ka dhex jirta adeegyo gaar ah, balse taasi macnaheedu ma aha in dadka isticmaala aysan waligood la kulmin ama qaadan aragtiyo kale ama kuwa ka duwan. Isla markaana, waxaanu ognahay in ay jirto farqi weyn oo u dhexeeya da'da dadka marka laga hadlayo hal-ka ay ka helaan wararka, iyadoo jiilka da'da yar uu si aad ah ugu tiirsan yahay baraha bulshada si uu uga helo warar.

---

Websaytka Hey’adda warbaahinta waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taageero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhal-linyarada – kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

Webbplatska **Hay’adda warbaahinta** waxaad ka heli kartaa talooyin fudud, taa-geero iyo agab ku saabsan caadooyinka isticmaalka warbaahinta ee carruurta iyo dhalinyarada, kuwaas oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta labadaba.

**Safer Internet Centre Sverige** (Xarunta Internetka ee Ammaanka) Iswiidhan) waa dadaal wadajir ah oo loogu talagalay badbaadada carruurta iyo dhalinyarada ee internetka. Hay’adda warbaahinta ayaa maamusha xaruntan iyadoo kaashanaysa ururada xuquuqda carruurta u dooda ee Bris iyo ECPAT.

Medfinansieras av
Europeiska unionen